Waa Maxay Isku Xirka Qoyska-Dugsiga (Family-School Compact)?

Heshiiska Qoyska-Dugsiga Title I ee Kasbashadu waa heshiis ay waalidiinta, ardayda iyo macalimiintu soo wada saaraan. Wuxuu sharxaa sida waalidiinta iyo macalimiintu ay uga wada shaqayn doonaan hubinta ardayda oo dhan inay helaan taageerada shakhsiyeed ee ay u baahan yihiin si ay u gaadhaan ugana saramaraan heerka waxbarashada fasalka.

Kennedy waa Iskuul Title 1 Iskuulka oo Dhan ah. Hadafka barnaamij Title 1 Iskuulka oo Dhan ah waa hubinta in ardayda oo dhan, gaar ahaan ardayda guushoodu hoosayso, in muujiyaan aqoon iyo heerar sare oo kasbasho waxbarasho ah.

Himilada Degmada 742

Oraahda Howlgalkayagu waa abuurista jawi badbaado iyo daryeel iyo dhaqan kaasi oo aanu ugu diyaarino, ku hawlgalino, wax ku barno, ku xoojino, oo ku dhiirigalino dhammaan ardayda iyada oo la kaashanayo bulshada ku hareeraysan si aan ugu guulaysano bulshada maanta iyo tan berriba.

Yoolasha Iskuulka

Akhriska: Boqolkiiba dhammaan ardayda fasalka 3-8 ee ka diiwaangashan Kennedy ugu yaraan kala bar sanadka iskuulka ee ku fiican imtixaanka akhriska ee la xisaabtanka gobolka (MCA) ayaa ka kordhi doona 56.7% Guga 2019 oo gaari doona 63.4% Guga 2022.

Xisaabta: Boqolkiiba dhammaan ardayda fasalka 3-8 ee ka diiwaangashan Kennedy ugu yaraan kala bar sanadka iskuulka ee ku fiican imtixaanka akhriska ee la xisaabtanka gobolka (MCA) ayaa ka kordhi doona 51.8% Guga 2019 oo gaari doona 59.5% Guga 2022.

Taageeridda Iskaashiga

Howlaha lagu Taageerayo Iskaashiga

Shirarka Soo Dhoweynta
- Sebtember 1 & 8

Shirarka Waalidka Macallinka ee Ardaydu Hogaaminayso Fasalada K-5
- Nofeembar 4 & 9, 3-7:30 p.m.
- Febraayo 28 & Maarso 3, 3-7:30 p.m

Shirarka Waalidka Macallinka ee Ardaydu Hogaaminayso Fasalada 6-8
- Oktoobar 14 & 19, 3-7 p.m.
- Janaayo 20, 3-6:30 p.m.
- (Tier 3) Heerka 3aad: TBD Janaayo-Maarso

Habeenka Waxbarashada STEAM Outdoor (STEAM Night)
- Oktoobar 6, 5-6:30 p.m.

Habeenka STEAM Saacadda Koodhka Qoyska
- Diisambar 2, 5-6:30 p.m.

Habeenka Akhriska-Qoraalka Hal Degmo Hal Buug TBD

Habeenka Kobcinta Xisaabta
- Maarso 3, 3-7:30 p.m.

Communicating About Learning

Kennedy waxa ka go'an inuu la sameeyo xiriir joogto ah qoysaska loo gaarsiiyo wixii kusaabsan barashada ilmahooda. Qaar kamid ah qaababka waalidiintu filan karaan inay ku helaan war isgaadhsiinta waxaa kamid ah:
- GalalkaXiriirka Maalinlaha ah ee Iskuulka/ Guriga
- Warsidaha Iskuulka ee Billaha ah
- Ajandayaasha/Qorsheeyeyaasha fasallada 2-5

Su'aalo? Waalidiintu waxay la xiriiri karaan macallinka ilmahooda si ay u eegaan horumarka.

320-370-7430

www.isd742.org/kennedy

1300 Jade Rd, St. Joseph, MN 56374

Iskuulka Bulshada ee Kennedy

Title I

Isku Xirka Qoyska-Dugsiga ee Guul Gaaridda ee

Dііrad Saaridda Guusha Ardayda

2021-22

St. Cloud Area School District 742!

Anna Willhite, Maamulaha
Anna.Willhite@isd742.org
320-370-7435

Fasalka Dhexdiisa Guriga Soojeedimaha Loogu Talogalay Guusha!

Dugsiyada Degmada 742 ayaa waxay la shaqeeyaan ardayda iyo qoysaska si ay u taageeraan guusha ardayda ee akhriska iyo xisaabta. Qaar ka mid ah xiriirada muhiimka ah ee qoysaska lala yeesho waxaa ka mid ah:

- Khayraadka websaydyada degmada iyo iskuulada ayaa waxay taageeraan oo ka dardargeliyaan waxbarashada ardayga waxaana laga heli karaa www.isd742.org.
- Minnesota Reading Corps waxay bixiyaan taageero keli keli ah (fool ka fool) ardayda fasalka koowaad.
- ADSIS (Hab Kale ee Gudbinta Adeega Waxbarashada Gaarka ah) waxay bixiyaan taageero dheeraad ah oo kooxo yar ah dhanka akhriska.
- AVID (Advancement Via Individual Determination) waa barnaamij koolejka u diyaariya oo ka caawiya ardayda in ay dhistaan xirfadaha ay u baahanyihiin si ay guul uga gaadhaan koolejka.
- ALEKS (Goobaha Qiimaynta iyo Barashada Aqoonta) waa barnaamij waxbarasho oo la qabsi ah oo loogu talagalay ardayda.

Akhriska iyo xisaabta ayaa waxay u baahanyihiin ku celcelin. Waa kuwan dhowr fikradood oo idinka caawin kara arrintaas. Qoysasku waxay ku darsan karaan fikrado kale liiskan.

- Ka soo qaybgala habeenada madadaalada qoyska oo ka qaybqaata hawlaha iyo xeeladaha si kor loogu qaado waxbarashada ardayda.
- La akhri ilmahaaga maalin kasta. PAKRAT (Parents and Kids Reading A-Lot Together) waxay bixiyaan buug kii hore ka duwan maalin kasta oo loogu talagalay ardaydu si ay guriga ugu soo qaataan oo wax u akhriyaan 20 daqiiqo.
- Ku raaxaysta xisaabta. Adeegada agabyada laga helo guriga si aad u daahfurtaan xisaabta, iyo websaydka iskuulka.
- Ku ciyaara ciyaaraha ereyada cusub oo raadiya hab cusub oo loogu isticmaalo ereyada sheekaysiga qoyska.
- Wax ogaada idinka oo soo raadsanaya wargeyska iskuulka oona soo booqanaya website-ka iskuulka si joogto ah.
- Ku xirnaada wixii goobaha waxbarasho ee internetka laga heli karo sida Symbaloo. Guji meesha ay ku qorantahay Student Connect ee bogga iskuulkaaga.
- Ku dhiiri geli oo ku taageer in teknoolojiyada loo isticmaalo dhanka waxbarashada. U isticmaal teknoolojiyada in aad kor ugu qaadaan waxbarashada iyo aqoonta ilmahaaga. Daawo baritaan khadka internetka ah si aad u barato Seesaw iyo Google Classroom.

Ardayda ayaa laga yaabaa inay rabaan inay isku dayaan fikradaha soo socda si ay isugu xiriiriyaan waxbarashada guriga iyo iskuulka:

- Ilmahaaga kala hadal waxay ku baranayaan xisaabta, akhriska iyo maadooyinka kale.
- Soo qaado wargeysyada fasalka guriga iyo ogeysiisyo ku saabsan habeennada madadaalada qoyska iyo dhacdooyinka.
- Hayso diiwaanka ciyaaraha ay ku ciyaaraan guriga si ay ugu tababartaan ereyada cusub iyo xisaabta.
- Isticmaala qaar ka mid ah link-yada waxbarasho ee badan oo laga heli karo website-ka iskuulka marka ay qabaan waqtiga shaashadda.